

Korontada oo go'do daadadka ka dib

Macluumaad ku saabsan cilladaha korontada daadadka ka dib

Somali | Soomaali

OFFICIAL

Waxa laga yaabaa inay qaadato wakhti inta ay korontada kasoo laabanayso daadadka ka dib. Isticmaal talooyinka hoose ee ku saabsan waxyaalaha aad samayn karto haddii ay korontadu tagto.

Talooyin ku saabsan sida loo hubiyo inaysan cuntada halaabin

- Tagista korontada waxay saameyn kartaa cuntadaada, xusuusnow inaad:
 - ✓ raashinka ka soo saartid talaajadaha (fridge) una soo wareejisid qeybta qaboojiyaha barafka
 - ✓ cuntadaada ka dhig qaboow saayid ah adiga oo saaraya baraf bacaysan ama buste wax qaboojiya (insulating blanket) korkana ka saaraya xirmooyinka cuntada
 - ✓ haddii cuntadaadu weli qabowdahay (in ka yar 5 °C), waa amaan in la isticmaalo
 - ✓ haddii cuntadaadu aanay qabow ahayn marka la taabto, waa la haysan karaa waana la cuni karaa ilaa afar saacadood ka dibna waa in la tuuraa ama la kariyaa oo la cunaa
 - ✓ ku cun cuntada kululaatay afar saacadood gudahood marka ay kululaato, ama iska tuur
 - ✓ haddii korontadu soo laabato ayadoo cuntadii barafka ahayd ay weli adag tahay, markaas cuntada hadana qaboojiyaha barafka waa lasii galin karaa.

Talooyin ku saabsan isticmaalka koronto dhaliyaha

- Koronto-dhaliyeyaasha ayaa caadiyan la isticmaalaa marka ay korontadu maqan tahay. Isticmaal talooyinkan ka hor intaadan isticmaalin koronto-dhaliye:
 - ✓ hubi in koronto-dhaliyaha batroolka ama naaftada lagu isticmaalo meelaha bannaanka ah ee hawo wanaagsan leh sababtoo ah waxay keeni kartaa sunta carbon monoxide taasoo kugu keeni karta xanuun aad u daran
 - ✓ koronto-dhaliyeyaasha sida sahlan loo qaadi karo ee loo isticmaalo dibadda laguma isticmaalo gurigaaga gudihiisa sababtoo ah waxay keeni karaan sunta carbon monoxide, shoog koronto ama dab
 - ✓ soo xiro koronto-dhaliyeyaal joogto ah (permanent generators) maadaama ay ku habboon yihiin inay dhaliyaan koronto keyd ah
 - ✓ dhig koronto-dhaliyahaaga meel qalalan. Waa inaad ku kaydisaa batroolka bannaanka meel xafidan
 - ✓ qalaji gacmahaaga ka hor intaadan taaban koronto dhaliyaha
 - ✓ hubi in fiilooyinka ama qalabyada kale ee korontada aysan waxyeelo gaarin ka hor intaadan shidin
 - ✓ dami oo qabooji koronto dhaliyaha ka hor inta aadan shidaal ku shubin. Shidaalka ku daata mishiinka kulul waxa uu dhalin karaa dab
 - ✓ alaabaha korontada ku shaqeyo ee la isticmaalo ku xidh koronto-dhaliyaha adiga oo isticmaalaya fiilo dheer oo adag
 - ✓ ha isku dayin inaad koronto siisid fiilooyinka guriga adigoo ku xiraya koronto dhaliyaha meel gidaarka kasoo baxsan (wall outlet).

Hel caawimaad

- Wixii macluumaad ah ee ku saabsan isticmaalka gaaska ama korontada oo si badbaado leh loo isticmaalo kala xiriir Energy Safe Victoria 9203 9700 ama booqo: www.esv.vic.gov.au
- Si aad u soo sheegto gaas soo daadanaya wac 132 771.

Si aad ugu heshid daabacaadan qaab sahlan, iimayl u dir pph.communications@health.vic.gov.au.